



## Duubitaanka wareysiga

Waaxda socdaalka (imaagareeshinku) mar walba waa ay duubtaa wareysiga qofka magangalyodoonka ah lala yeelanaayo – Markaad rabto ayaad codsan kartaa in aad hesho wareysigaas la duubay.

Wareysiga la duubay waxaa la keydinayaa muddo shan sano ah.

Adiga nafsat ahaantaada ayaad u dalban kartaa wareysigaaga lagaa duubay, waana lacag la'aan. Waxaa wareysiga la duubay laguugu soo shubayaa cajaladda CD ga. Sababo xagga ammaanka ah awgood, wareysigaas lagaa duubay ma laguugu soo diri karo iimeylka lifaaq ahaan.

[Waxaad wareysiga lagaa duubay ku dalban kartaa foomka codsiga warbixinta.](#)

Haddii aad dooneysana, waxaad wareysiga lagaa duubay ku dhegeysan kartaa xarunta Waaxda socdaalka (imaagareeshinku) dhexdeeda.

## Sidoo kale adiga ayaa nafsat ahaantaada duuban kara wareysigaaga

Wareysiga magangalyodoonka waxaa lagu qabtaa goobo aanay dadweynuhu soo geli karin. Qolalkaas dheddooda waa la ogol yahay in aad wareysigaaga duubato, taasoo loola jeedo duubista xagga codka, sawir ahaan, ama fiidyoow ahaan, si loo arko howsha Waaxda socdaalka (imaagareeshinku).

In sawirro khaas ah ama fiidyoow laga qaado howlwadeennada waaxda socdaalka ama turjubaanka lama ogola, waayo arinkaas ma ahan mid khuseeya wareysiga ama la socodka howsha ay qabanayaan qofka wareysiga qaadaya iyo tan turjubaankaba.

## Duubitaanka waxaa la ogol yahay in xilliga wareysiga lagu duubo oo kaliya goobta warysigu ka dhacayo

Wareysiga magangalyodoonka ah waxaad ku duubi kartaa oo kaliya xilliga uu wareysigu socdo goobta wareysiga lagu sameynaayo. Waxba ma duubi kartid cod iyo filin ahaan toonna, waresyiga ka hor ama kadib, xilliyada bareegga, ama meel ka baxsan goobta wareysiga, tusaale ahaan meesha hore ee gudaha ee lagu nasto oo ay dadka kale joogaan.

Dabeecadda arimaha magangalyodoonista awgeed, howlwadeennada waxaa saaran waajibka ah in ay ilaaliyaan ama dhowraan aqoonsiga iyo waxyaabaha u gaarka ah dadka maganagalyodoonka ah, sababtaas awgeed ayaana loo diidaa in wax duubis ah lagu sameeyo goobaha guud ee ay dadka magangalyodoonka ah joogaan.

Asal ahaan duubista waa la ogol yahay in lagu sameeyo qolalka wareysiga ee xabsiga kumeelgaarka ah ee dadka lagu sii haayo (säilöönnotto). Waxaa dhici karta in xaalado khaas ah awgeed wax ku duubista xabsiga



kumeelgaarka ah ee daaka lagu sii haayo la xadidi karo, iyadoo lagu saleynaayo sharciyada arinkaas ka degsan.

Haddii aad duubeyso wareysigaaga, waa in aad xusuusnaataa:

- In wax duubistu aanay wax tashwiish ama qashqashaad ah ku keenin wareysi-ga. Wareysiga waa la jooin karaa, haddii ay wax duubistu qashqashaad ama tashwiish ku keento shaqada wareysi qaadaha iyo turjubaanka, ama adiga u dhug yeelashadaada wareysiga.
- Telefoonka gacanta in uu kuu daarnaado marka wareysiga la duubaayo iyo wixii arinkaas ku saabsan ee khatarta ammaanka warbixinta ah, adiga ayaa mas'uliyadda arintaas qaadaaya oo iska leh. Waaxda socdaalka (imaaga-reeshinka) waxaa ay kuu soo jeedineysaa in marka wareysiga la qaadaayo aad telefoonka iska damiso, haddii aadan duubeynin wareysigaaga.
- Goobta wareysiga lama keeni karo qalab kale oo dheeraad ah, sida nalalka, si-doo kale lama keeni karo dad kale oo dheeraad ah si ay wareysiga u duubaan.